



## Musharixiin ayaa loo raadinayaa barnaamij loogu tabobarayo xubnaha bulshada ee laba luuqadood ku hadla inay macallimiin noqdaan

Ma tahay qof laba luuqadood ku hadla oo kulliyad ka qalinjabiyey ama u dhawdahay qof kulliyad ka qalinjabiyey oo jeclaan lahaa inuu isbaddal ku sameeyo nolosha ardayda? Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay qaadanaayaan musharixiin loogu talagalay Barnaamijkooda Dual Language Teacher Residency. Barnaamijku wuxuu ka caawinayaa u diyaarinta macallimiinta mustaqbalka shaqo ah macallimiin laba luuqadood ku hadla.

Iyadoo ka qayb ah dedaalka aannu ugu jirno xiritaanka baahida soo jirtay ee ardayda aan si buuxda loogu adeegin, PPS waxay qaadanaaysaa oo tabobaraysaa musharixiin laba luuqadood ku hadla oo bulshadeenna ka socda iyo shaqaale inay kaqaybqaataan barnaamijkeenna shati bixinta ee kale. Waxay waddo u furaysaa macallimiinta mustaqbalka inay bartaan digriiga afarta sano ee waxbarashada ah, iyada oo ay jirto fursadda in shaqo laga siiyo PPS.

Barnaamijka, oo hore loogu yaqaanay Barnaamijka Portland Dual Language Teacher Fellows, waxa loo bilaabay inuu wax ka qabto wixii ahaa baahida labada god ee macallimiinta labada luuqadood ku hadla loo qabo. Macallimiinta waxa loo baahan doonaa in la aqbaloo barnaamijka diyaarinta macallinka ee Portland State University ama Oregon State University.

Ka qayb ahaan barnaamijkan, kaqaybqaatayaashu waxay u baahan doonaan inay dhigtaan machad xagaaga ah oo laba luuqadood lagu dhigto, inay ku helaan taageerada hagitaanka jaamacaddooda, iyo inay galaangal u yeeshaan kobcinta shaqo-yaqaannimo iyo kulamo ah taageerada qorshaynta manhajka, kuwaasi oo dhammaantood ay maalgalinayso PPS.

Halkan PPS, kaqaybqaatayaasha labada luuqadood ku hadla waxay dhigi karaan barnaamijka kaqaybgalinta labada luuqadood ee heerarka PK-12. Sidoo kale waxay dhigi karaan farshaxanka luuqadda ama cilmiga bulshada iyagoo adeegsanaya luuqaddooda koowaad iyo/ama Ingiriisi fasalada dugsiiga dhexe, iyo luuqadda adduunka fasalada 6-12. Degmadu waxay leedahay barnaamijyo labada luuqadood ah oo ah Isbaanish, af Jayniis, af Ruush, af Fiitnaam iyo af Jabbaan, sidoo kale waxay leeyihiin kaqaybqaatayaashu ku hadashada Soomaali iyo Carabi.

Barnaamijku wuxuu qaban doonaa kulan xog-iswaydaarsi oo dhici doona Arbacada, 6 g.d. kana dhici doona Columbia Room ee dabaqa labaad ee Blanchard Education Service Center (501 N. Dixon St.). Macluumaad dheeraad ah waxa laga heli karaa [websaytka barnaamijka](#), oo ay kujirto [casharadii kulamadii xog-iswaydaarsi ee hore](#).

Maalinta ugu dambaysa ee dalbashadu waa Arbacada, Jeeniwari 15, laakiin dalabyada ka dambeeya taariikhdaas waa la qaban doonaa haddii qabanqaabo hore jirtay. Kala xiriir Alma Morales Galicia macluumaad dheeraad ah [amoralesgalicia@pps.net](mailto:amoralesgalicia@pps.net) ama 503-916-3546.